NAPLAN ka Online-ka – Macluumaadka waalidiinta iyo daryeelayaasha

Somali

2019

Maxay ardaydu u sameeyaan NAPLAN?

Barnaamijka Qiimaynta Qaranka – Aqris-qoraalka iyo Tirinta (NAPLAN) wuxuu qiimeynayaa xirfadaha akhris/qorista iyo Tirinta ee muhiim u ah ilmo kasta si uu ugu horumariyo dugsiga iyo nolosha. Ardayda ku jirta Sannadaha 3aad, 53aad, 73aad iyo 93aad waxay ka qeybgalaan imtixaannada sanadlaha ah ee NAPLAN ee akhriska, qoraalka, heshiisyada luqadda (higgaadinta, naxwaha iyo xarakaynta) iyo tirinta.

Qiimeyntu waxay waalidiinta iyo dugsiyada siineysaa faham ah sida ardeyda shakhsiga ah ay wax uga qabtaan waqtiga imtixaanka. NAPLAN waa hal dhinac oo ka mid ah qiimeynta dugsiga iyo habka warbixinta - ma beddeli doonto qiimeynta joogtada ah oo ay sameeyaan bareyaasha ee waxqabadka ardayga.

NAPLAN waxay sidoo kale siisaa dugsiyada, hay'adaha waxbarashada iyo dawladaha macluumaadka ku saabsan sida barnaamijyada waxbarashada u shaqeynayaan iyo in dhalinyarada Australiyaanka ahi ay helaan natiijooyinka waxbarashada ee muhiimka ah ee akhriska iyo qorista iyo tirinta.

Maxaa la qiimeeyaa?

NAPLAN waxay qiimeysaa xirfadaha akhris/qorista iyo tirinta ee ardayda ay ka baranayaan manhajka dugsiga caadiga ah. Dhammaan hay'adaha dawlada iyo kuwa aan dawliga ahaynba way ka qayb qaateen horumarinta qalabka NAPLAN.

Sannadka 2019 ardayda badankood ee ku Australia oo dhan waxay u fadhiisan doonaan NAPLAN-ka online-ka.

Jawaab-celinta sanadka ugu horreeya ee NAPLAN Online-ka waxay muujisay in ardayda ay si fiican u qabteen qiimeynta online. Mid ka mid ah faa'iidooyinka ugu muhiimsan ee NAPLAN Online ayaa ah mid loo qaabeeyey (ama la-qabsasho) imtixaanka, halkaas oo imtixaanku si toos ah loogu habeeyo waxqabadka imtixaanka ardayga. Imtixaanku wuxuu soo bandhigayaa su'aalo adkaan sare ama hooseeya leh, taas oo ku xidhan waxqabadka ardayga.

Imtixaanka la qoondeeyey (ama la qaabeeyey) waxaa loogu talagalay in lagu qiimeeyo awoodda ardayga oo ballaaran iyo si loo qiyaaso waxqabadka ardayga si sax ah. Ilmahaagu waa inuusan ka walwalin hadday suurtagal tahay inay helaan su'aalo ka adag sidii caadiga ahayd; waxaa suurtagal ah inay qaadan doonaan marin adag oo imtixaan ah. Guud ahaan dhibcaha NAPLAN ee ardaygu wuxuu ku saleysan yahay tirada iyo kakanaanta su'aalaha ay si sax ah uga jawaabaan.

NAPLAN Online maahan imtixaanka xirfadaha keyboard-ka. Waxaa jira kala duwanaansho sida dhakhsaha badan uuguna fiican ee ardaygu u teebgareen karo - sidaay u kala duwan yihiin sida ugu dhakhsaha badan uguna fiican ee ardaygu ugu qori karo gacanta. Ardayda Sanadka 3aad waxay ku dhamaystiri doonaan imtixaanka qoraalka ah ee warqadda.

Si aad fikrad uga hesho waxa qiimeynta online-ka ah u e'gtahay, ka eeg bogga bandhiga dadwaynaha ee **nap.edu.au**

Sidee baan ugu caawin karaa ilmahayga inuu is-diyaariyo?

Ka caawi ilmahaaga inuu diyaariyo adigoo u xaqiijinaya in NAPLAN ay ka mid tahay qayb ka mid ah barnaamijkooda dugsiga, iyo adigoo oo xusuusinaya maalintii inay isku-dayaan sida ugu fiican. Bareyaasha waxay hubin doonaan in ardaydu ay yaqaanaan noocyada su'aalaha ee imtixaanada waxayna bixin doonaan taageero iyo hagid habboon. Hubinta ardayda inay yaqaanaan isticmaalka qalabyada, iyagoo ku teebgaraynaya iyo sahminta barnaamijyada waa qayb ka mid ah barashada ardayga iyo shuruudaha manhajka Australiya laga bilaabo sannadka koowaad ee dugsiga.

ACARA kuma talinayso diyaarinta xad dhaafka ah ee NAPLAN ama adeegsiga tababar bixiyayaasha. NAPLAN waxay ku saabsan tahay qiimeynta horumarka waxbarashada ee xaga akhris-qorista iyo tirinta.

Ilmahaygu ma waxuu ku qaadan NAPLAN warqad mase online?

Sanadka 2019, ilmahaagu wuxuu u fariisan doonaa imtixaanada NAPLAN online-ka. Si kastaba ha ahaatee, carruurta dhigata dugsiyada kale qaarkood ee Australia waxay ufariisan doonaan imtixaanada warqadda NAPLAN ee sanadkan. Wasiirada waxbarashada ee federaalka, dawlad-goboleedka iyo territoriska ayaa isku raacay in dhammaan dugsiyadu ay u guuri doonaan online-ka 2020-ka. Maamulka waxbarashadda ee dawlad-goboleedka iyo territoriga ayaa go'aamin doona goorta dugsiyadoodu u wareegayaan online-ka.

Marka ardaydu lagu qiimeeyo isla manhajka akhris-qoraalka iyo tirinta, iyadoon loo eegin haddii ay dhamaystireen Online-ka ama warqada, natiijooyinka labada qaab ayaa lagu soo gudbin karaa isla miisaanka qiimaynta NAPLAN. Si aad wax badan uga ogaato NAPLAN Online, ka eeg **nap.edu.au**

Ka qaybgalka NAPLAN

Dhammaan ardayda dhigata Fasalada 3aad, 5aad, 7aad iyo 9aad ayaa la filayaa ka qeybgalaan qiimeynta NAPLAN ee sanadlaha ah.

Ardayda naafada ah waxay xaq u leeyahiin dib u habaynta taasoo ka tarjumaysa taageerada sida caadiga ah laga bixiyo qiimeynta fasalka. Waa in aad marka hore kala hadashid isticmaalka habaynta iinta baraha ilmahaaga.

Ka-dhaafitaan rasmi ah ayaa la siin karaa ardayga qaba iinta taasoo si weyn u yaraynaysa awooda ay uga qayb-qaadanayaan qiimeynta, ama arday dhawaan yimid Australia oo leh asal aan Ingiriisi ahayn.

Maamulaha dugsigaaga iyo haya'dda maamulaha imtixaanka degaankaaga ayaa kaa siin kara macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habaynta iinta ee NAPLAN Online ama habka looga baahan yahay si loo helo ka-dhaafitaan rasmi ah.

Jadwalka NAPLAN Online ee 2019

Daaqadda qiimeynta ee NAPLAN Online waa laga kordhiyay seddex maalmood oo loogu talagalay imtixaanka warqadda ilaa sagaal maalmood. Tani waa inay siiso dugsiga jajabnaanta dheeraadka ah ee jadwalka iyo la socodka dugsiyada kuwaas oo laga yaabo inay leeyihiin aalado yar. Daaqadda qiimeynta ee NAPLAN Online waxay bilaabanaysaa Talaadada 14ka May waxuuna dhamaanayaa Jimcaha 24ka May 2019.

Imtixaannada online-ka waa in loo qaadaa sida soo socota:

Imtixaanka	Muddada	Kala-horumarinta	Faahfaahinaha
Qorista	Sanad 3aad: 40 daq. Sanad 5aad: 40 daq. Sanad 7aad: 40 daq. Sanad 9aad: 40 daq.	Waa in lagu dhameeyaa labada maalmood ee ugu horreeya	Ardayda sanadka 3aad waxay samaynayaan imtixaanka qoraaalka oo warqada ku salaysan maalinta koowaad kaliya
Akhrinta	Sanad 3aad: 45 daq. Sanad 5aad: 50 daq. Sanad 7aad: 65 daq. Sanad 9aad: 65 daq.	Waa in la dhameeyaa Imtixaanka qoraalka kadib	Ardaydu waxay akhrinayaan qoraallo badan oo wargelin, qiyaali ah iyo kuwo wax qancinaya
Heshiisyada luqadda	Sanad 3aad: 45 daq. Sanad 5aad: 45 daq. Sanad 7aad: 45 daq. Sanad 9aad: 45 daq.	Waa in la dhameeyaa Imtixaanka akhriskaa ka dib	Imtixaankan waxaa ka mid ah higgaadinta, naxwaha iyo xarakaynta
Tirinta	Sanad 3aad: 45 daq. Sanad 5aad: 50 daq. Sanad 7aad: 65 daq Sanad 9aad: 65 daq.	Waa in la dhameeyaa marka laraaco heshiisyada luqadda ka dib	Imtixaankan waxaa ku jira nambarka iyo aljebrada; cabbirka iyo joomatari; iyo tirakoobka iyo saadaash

Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu dugsiga ka maqnaado maalmaha qiimeynta?

Meeshii suurtogalka ah, dugsiyadu waxay u diyaarin karaan arday gaar ah ee ka maqnaada xilliga imtixaanka si ay u dhamaystiraan imtixaannada la seegay waqti kale inta lagu jiro jadwalka imtixaanka dugsiga. Ardayda shakhsiyaadka looma oggola inay u fariistaan imtixaanada NAPLAN online Jimcaha 24 May 2019

Sidee ayaa loo cabbiraa waxqabadka ilmahayga?

Waxqabadka ardayga ee shakhsiga ah ayaa lagu muujiyay miisaanka guusha ee qaranka qiimeyn kasta. Natiijada heerarka ugu hooseeya ee qaranka ayaa muujinaya in ardaygu muujiyay xirfadaha aasaasiga ah ee akhris/qorista iyo tirinta ee looga baahan yahay inuu si buuxda uga qaybqaato heerka sannadkaas.

Warbixinta ardayga NAPLAN ee shakhsi ahaaneed ayaa laga soo saari doonaa dugsiga ilmahaaga hadhaw sannadka. Haddii aadan helin warbixinta, waa inaad la xiriirtaa dugsiga ilmahaaga.

Sidee loo isticmaalaa natiijooyinka NAPLAN?

- Ardayda iyo waalidku waxay isticmaali karaan natiijooyinka shakhsi ahaaneed si ay ugala hadlaan horumarka bareyaasha
- Bareyaashu waxay u isticmaalaan natiijooyinka si ay si fiican u aqoonsadaan ardayda ka faa'iideysan kara caqabado waaweyn ama taageero dheeraad ah.
- Dugsiyadu waxay isticmaalaan natiijooyin si loo ogaado awooda iyo meelaha laga hagaajinayo barnaamijyada barista iyo inay dejiyaan barnaamijyo ah akhriska iyo tirabarashada.
- Nidaamyada dugsiga waxay isticmaalaan natiijooyin si ay dib ugu eegaan barnaamijyada iyo taageerada loo fidiyo dugsiyada.
- Bulshadu waxay arki kartaa natiijooyinka dugsiga NAPLAN ee dugsiga hoose ee **myschool.edu.au**

Halkee ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan NAPLAN:

- La xiriir dugsiga ilmahaaga
- waxaad la xiriirtaa hey'adda maamulka imtixaanka deegaankaaga **nap.edu.au/TAA**
- ka eeg **nap.edu.au**

Macluumaadka ku saabsan sida macluumaadka shakhsiyeed ee NAPLAN waxaa maamuli doonta ACARA, ka eeg **nap.edu.au/naplanprivacy**